

Bogga waxaa la cusboonaysiiyay 05/12/2020. Fadlan bogaan si joogto ah usoo booqo si aad u hesho xog cusub. Haddii aadan hoos Ka-helin xogtii aad raadinaysay, fadlan wac Laynka Xogta ee ECDOH COVID-19 oo ah (716) 858-2929.

([Español](#)) ([Carabi](#)) ([Afka Baarmiiska](#))

COVID-19 ayaa laga dhex helay bulshadeena. Qof kasta waa inuu la socdaa caafimaadkiisa uuna iska fiiriyaa astaamaha COVID-19, kuwaasoo ay ku jiraan mid kasta oo kamid ah astaamaha soo socda: qandho dhan 100.4 digrii ama ka badan, qufac, neef yaraan, qarqaryo, gariir joogto ah oo qarqaryo wata, murqo xanuun, madax xanuun, dhuun xanuun, shuban, luminta dhadhanka ama urka oo cusub.

Baaritaanka COVID-19

Ku deeqida Carunka dhiiga

Sida aad U difaacayso Naftaada

Waxa ay Tahay inaad Samayso Haddaad Jiran tahay

1. Waa maxay COVID-19?

Cudruka Korona fayras 2019 (COVID-19) waa xanuun dhanka neef mareenka ah oo dadku is qaadsiin karaan. Fayraska keena cudurka COVID-19 waa korona fayras nooc cusub ah oo markii koobaad la helay intii lagugudo-jiraybaaris lagu samaynaayay cudur ka dilaacay Wuhan, Shiinaha. **Si aad u hesho xogtii ugu danbaysay, booqo webseetka [CDC ee COVID-19](#).**

2. Maxaa lagu gartaa cudurka COVID-19?

Bukaanada qaba COVID-19 waxay qabeen xanuun neef mareenka ah oo u dhaxeeya mid fudud ilaa mid daran oo leh astaamo ay kamid yihiin:

- Qandho (100.4 digrii ama ka badan)
- Qufaca
- Neefta oo yaraata
- Qarqaryo
- Gariir joogto ah oo qarqaryo wata
- Xanuunka murqaha
- Madax xanuun
- Dhuun xanuunka
- Luminta dhadhanka ama urka oo cusub
- Shuban
- Dadka qaar ayaa xanuuno aad u daran ka qaadi kara.
- CDC ayaa aaminsan in waqti xaadirkaan ay astaamuhu qofka ku bilaaban karaa muddo yar oo 2 maalmood gudaheed ah ama muddo dheer oo ilaa 14 maalmood ah kadib marka uu qaado fayraska.

3. Sidee ayuu ku faafa COVID-19?

Fayraska keena COVID-19 waxaa la aaminsan yahay inuu badanaa dadka dhexdooda iskaga faafo, asagoo inta badan ku faafa dhibcaha neef mareenka ee qofka jiran kasoo baxa markuu qufaco ama hindhiso. Dhibcahan yayar ayaa kaa gali kara afka ama sanko dadka u dhaw qofka qufacay ama waxaa lagu jidi karaa neefta gaarta sanbabada. Fayraska ayaa badanaa faafa marka dadku ay isku dhawaadaan (wax ka yar 6 fiid (sadx mitir). Arag xogta [CDC ee ku aadan Sida uu u faafa COVID-19](#).

4. Sidee ayaan iskaga caawin karaa difaacida naftayda?

Waqti xaadirkaan lama hayo talaal looga hortago caabuqa COVID-19. Sida ugu fiican ee aad cabuqa uga hortagi karto waa inaad ka dheeraato meelaha aad ka qaadi karto. Hase yeeshee, waa inaad raacdaa talaabooyinkaan maalin laha ah si ay kaaga caawiyaan kahortaga faafinta fayrasyada neef mareenka.

- **Si joogto ah oo sax ah u dhaq gacmahaaga** adoo ku dhaqaaya saabuun iyo biyo ugu yaraan 20 Sikinba. Haddii aadan haysan biyo iyo saabuun, adeegso daawada gacmaha nadiifisa oo aalkolo ka samaysan.
 - **Daawo muuqaalkaan cajiibka ah**, dadka kale la wadaag **xoqtaan muhiimka ah** oo **si amaan leh u adeegso nadiifyaha gacmaha**
- **Ka dheerow ku taabashada indhahaaga, sankaaga, iyo afkaaga** gacmahaaga oo aadan dhaqin.
- **Ka fogow inaad u dhawaato** dadka xanuunsan.
- **Ku dabool** qufacaaga iyo hindhisadaada tiish, kadibna tiishka ku rid goobta qashinka, kadibna ku Faraxalo saabuun iyo biyo tuubo ka socda kadib markaad taabato tiishka. Haddii aadan haysan tiish, ku qufac ama ku hindhis xagasha suxulkaaga.
- **Nadiifi** oo daawada jeermiska mari meelaha iyo alaabta badanaa la taabto (tusaale ahaan: miisaska, qataarada albaabka, batoonada nalka laga daaro, gacanada, miisaska, musqusha, tuubooyinka biyaha, siimanka). Arag xogta **Nadiifinta iyo Marinta Daawada Jeermiska Gurigaaga** waxaana haboon inaad isticmaasho **daawooyinka jeermiska dila ee quriga ee ka diiwaan qashan EPA**. Raac tilmaamaha ku qoran dusha qasaca (sida xirashada gacmo gashi iyo xaqiijinta inaad hawo fiican qaadnayso inaad daawada isticmaalayso) si aad u xaqiijiso adeegsiga badqabka iyo waxtarka leh ee daawada.
- Xiro **afxir (maaski)** (arag Su'aasha #5).
- **Ka fogoow Dadka kale** (arag Su'aasha # 10)
- Arag **Liiska hubinta ee CDC ay ugu tala gashay Shaqsiyaadka iyo Qoysaska** iyo
- **Diyaari Gurigaaga** -Samayso qorshe oo baro waxa aad samaynayso haddii qof gurigaaga jooga uu la jirado astaamaha cudurka COVID-19

5. Ma tahay inaad xidho afxir?

- Laga soo bilaabo 8 fiidnimo. maalintii Jimcada ahayd, bishii Abriil 17, 2020 qof kasta oo ku nool Gobalka New York kaasoo ka wayn da'da labo sano caafimaad ahaana xamili kara inuu xirto afxir ayaa laga doonayaa inuu afka xirto markuu joogo meelaha bulshada u iskugu timaado Hadduusan awoodin inuu joogteeyo, ama aan joogtaynayn, kala fogaanshaha bulshada. Xasuusnoow inaad afka xirato kama dhigna inaad iska ilowdo talaabooyinka kale ee ka hortagga ah — waxaan wali kula talinaynaa dhammaan dadka reer New York inay guriga joogaan mar kasta marka laga reebo inay u baxaan hawlo muhiim ah. Waa muhiim inaad akhrido dhammaan qaybaha uu qabanayaan Amarada Fulinta si aad fahan buuxa uga hesho dhibaatooyinka imaan kara. Ka fiiri **Amarka Fulinta ee Tirsigiisu yahay 202.17 halkaan**.
- Arag **Tilmaanta Ku meel Gaarka ah ee NYSDOH ee Ku aadan Amarada Fulinta ee tirsigoodu yahay 202.17 iyo 202.18 Oo Qasab Ka dhigaaya Af Xirashada Markaad Joogto meelaha Bulshada u dhaxeeya inta uu Socdo Cudurka COVID-19** (Abriil 17, 2020)
- Arag **Sida loo Samaysto Ama Loo xidho Afxirka**.

6. Maxaan samaynayaa haddii aan la joogay qof qaba astaamaha COVID-19, kuwaasoo ay ku jiraan mid kasta oo kamid ah astaamaha soo socda: qandho dhan 100.4 digrii ama ka badan, qufac, neef yaraan, qarqaryo, gariir joogto ah oo qarqaryo wata, murqo xanuun, madax xanuun, dhuun xanuun, shuban, luminta dhadhanka ama urka oo cusub?

- Guriga joog 14 maalmood oo xariir ah lagasoo bilaabo markii u danbaysay ee aad qaaday cudurka . Haddii aad tahay **shaqaalle muhiim ah** adoon leex-leexan aad shaqada kadibna toos u aad guriga.
- Ka fogoow dadka kale (ku dhawaad 6 fiid ama 2 mitir).
- Waa inaysan cidna kugusoo booqan gurigaaga inta lagu jiro mudadaan.
- Iska fiiri astaamaha xanuunka.

7. Maxaan samaynayaa haddii aan isku arko astaamaha COVID-19, kuwaasoo ay ku jiraan mid kasta oo kamid ah astaamaha soo socda: qandho dhan 100.4 digrii ama ka badan, qufac, neef yaraan, qarqaryo, gariir joogto ah oo qarqaryo wata, murqo xanuun, madax xanuun, dhuun xanuun, shuban, luminta dhadhanka ama urka oo cusub?

Haddii aad qabto astaamaha:

- Inta badan dadka qaba COVID-19 waxay qaadaan **xanuun fudud** waxayna awoodaan inay ka bogsadaan cudurka ayagoo guriga jooga.
- **Joog gurigga** kana fogoow dadka kale ee guriga kugula nool. Ha ka bixin gurigaaga, ilaa inaad daryeel caafimaad raadsanayso maahee. Ha booqan meelaha dadwaynaha u dhaxeeya.
- **Wac** dhakhtarkaaga una sheeg astaamaha aad dareemayso. Toos ha u aadin xafiiska dhakhtarka ama waaxda xaalada degdega ah/xarunta daryeelka degdega ah adoon wicin marka hore. Haddii aad dareemayso inaad ku jirto xaalad caafimaad oo degdeg ah, si degdeg ah u wac 911 una sheeg astaamaha xanuunkaaga.
- **Ku dabool** qufacaaga iyo hindhisadaada tiish, kadibna tiishka ku rid qasaca qashinka, kadibna ku farxalo saabuun iyo biyo tuubo ka socda kadib markaad taabato tiishka. Haddii aadan haysan tiish, ku qufac ama ku hindhis xagasha suxulkaaga.
- **Si joogto ah u dhaq gacmahaaga** adoo ku dhaqaaya saabuun iyo biyo tuubo ka socda ugu yaraan 20 sakin.
- **Nadiifi** oo daawada jeermiska mari meelaha iyo alaabta badanaa la taabto (tusaale ahaan: miisaska, qataarada albaabka, batoonada nalka laga daaro, gacanada, miisaska, musqusha, tuubooyinka biyaha, siimanka). Arag xogta [Nadiifinta iyo Marinta Daawada Jeermiska Gurigaaga](#) waxaana haboon inaad isticmaasho [daawooyinka jeermiska dila ee guriga ee ka diiwaan qashan EPA](#). Raac tilmaamaha ku qoran dusha qasaca (sida xirashada gacmo gashi iyo xaqiijinta inaad hawo fiican qaadnayso inaad daawada isticmaalayso) si aad u xaqiijiso adeegsiga badqabka iyo waxtarka leh ee daawada.
- **Ka dheeroow** inaad dadka la wadagato alaabtaada shaqsiga ah
- Xiro **afxir (maaski)** (Arag Su'aasha #5).
- [Talaabooyin kaa caawinaaya ka hortaga faafinta COVID-19 haddii aad jiran tahay](#) (CDC)
- [10 waxyaabood ood samayn karto si aad u maarayso caafimaadkaaga adoo guriga jooga](#) (CDC)

8. Goorma ayay [Shaqaalaha Muhiimka ah](#) ku laaban karaan shaqada kadib markay qaadeen ama uu ku dhacay cudurka COVID-19?

- [Maamuusyada NYSDOH ee Ku aadan **Shaqaalaha Xarumaha Kalkaalinta** si ay ugu Laabtaan Shaqada kadib markuu caabuqu ku dhacay COVID-19 ama ay qaadeen Caabuqa](#) (Waxaa la cusboonaysiiyay 04/29/2020)
- [Maamuusyada NYSDOH ee Ku aadan **Shaqaalaha Daryeelka Caafimaadka iyo Xarumaha Kale ee Daryeelka Tooska ah** si ay ugu Laabtaan shaqada kadib Markuu caabuqu ku dhacay ama ay ayagu Qabeen Caabuqa COVID-19](#) (Waxaa la cusboonaysiiyay 03/31/2020)
- [Maamuusyada NYSDOH ee Ku aadan **Shaqaalaha aan ahayn Kuwa Daryeelka Caafimaadka iyo Xarumaha Kale ee Daryeelka Tooska ah si ay ugu Laabtaan shaqada kadib Markay qaadeen ama ay ayagu Qabeen Caabuqa COVID-19**](#) (Waxaa la cusboonaysiiyay 03/31/2020)

9. Goorma ayaan ka bixi karaa gurigayga kadib markaan isku arkay astaamaha COVID-19, kuwaasoo ay ku jiraan mid kasta oo kamid ah astaamaha soo socda: qandho dhan 100.4 digrii ama ka badan, qufac, neef yaraan, qarqaryo, gariir joogto ah oo qarqaryo wata, murqo xanuun, madax xanuun, dhuun xanuun, shuban, luminta dhadhanka ama urka oo cusub?

Dadka qaba COVID-19 ee guriga joogay waxay guriga ka bixi karaa markay buuxshaan sharuudaha soo socda:

- In laga joogo ugu yaraan 7 maalmood markii astaamaha koobaad kaasoo baxeen.
- Inaad lahayn wax qandho ah ugu yaraan 3 maalmood oo kaamil ah (72 saacadood oo xariir ah) oo taxane ah adoon cunin wax daawooyinka qandho jabinta ah.

IYO

- Astaamaha kale ee xanuunkaagu ay bogsoodeen (tusaale, marka qufacaaga ama neeftii ku dhibaysay ay kaa ba'aan).
- La tasho dhakhtarkaaga adoo ka wacaaya taleefanka si uu kuu siiyo tilmaan dheeraad ah.
- Arag Su'aasha #11.

10. Waa maxay talooyinka iyo tilmaamaha kala fogaanshaha dadka?

- **Inaad guriga joogto waxay badbaadinaysaa nafta dad kale waxayna difaacaysaa bulshadeena.**
- Guriga joog inta ugu badan ee macquulka ah. Adeegso adeegyada alaabaha laguugu keenaayo guriga iyo adeegyada dukaamaysiga oonleenka ah ee lagu baxsho dukaanada raashinka, farmashiyaasha iyo adeegyada kale ee muhiimka ah. Haddii sababo jiro awgood ay qasab tahay inaad guriga ka baxdo, xiro gafuurka oo u jirso ugu yaraan 6 fiid dadka kale. (Arag Su'aasha #5)
- Hala kulmin dadka ku nool meel ka baxsan gurigaaga.
- Ha aadin dukaanada ama meelaha kale ee bulshada u dhaxeeya si aad ugusoo baashaasho ama sabab la xariirta inaad guriga ku caajistay.
- Dadka isticmaala ama ka shaqeeya gawaarida la isla raaco, adeegyada tagsiga iyo gaadiidka dadwaynaha waa inay sameeyaan dadaal kasta inay ka fogaadaan ugu yaraan lix fiid dadka kale ilaa heerka suuragalka ah. Dadka ka shaqeeya tagaasida iyo gaariyaasha la isla fuulo waa inay qaadaan talaabooyin ay si sax ah daawada jeermiska ugu dhaqayaan meelaha adag ee gaariga mudada u dhaxaysa labada rakaab iyo mar kasta oo ay tagaan meelaha basasku istaagaan.
- Arag qaybta [Gobalka New York State oo kujiira SHAQO JOOJIN](#)
- Arag [Xoq ku Aadan Xiritaanka Ganasiyada iyo Shaqaalaha](#)

11. ECDOH miyay i siin kartaa ogaysiiska "ku laabashada shaqada" oon ka ahayn ogaysiiska aan ka helo dhakhtarkayga?

Arag [Dukumintiyada ECDOH ee ka hadlaaya Takoorka iyo Karantiilka La xariira COVID-19](#).

12. Qofkee ayaa Khatarta ugu badan ku jira inuu aad ugu xanuunsado cudurka COVID-19?

Sida ku cad daraasad kooban oo la sameeyay, dadka duqoowda ah, dadka qaba xanuunada caafimaadka ee daran (tusaale, xanuunka wadnaha, sonkoroowga iyo xanuunka sanbabada), iyo dadka difaacooda jirku liito ayaa khatar dheeraad ah ugu jiray inay xanuun xun ka qaadaan COVID-19.

13. Sidee ayaa la iiga baarayaa cudurka COVID-19?

Labo nooc oo baaritaano ah ayaa lagu samayn karaa COVID-19: 1) baaritaanka dheecaanka (dheecaan laga qaado sanko) iyo 2) baaritaanka unugyada difaaca jirka (baaritaanka dhiiga). Baaritaanka dheecaanka ayaa kuu sheegaaya haddii aad hadda qabto caabuqa. Baaritaanka dhiiga ayaa kuu sheegaaya haddii aad horay u qabtay caabuqa.

Baaritaanka dheecaanka ee COVID-19 (Dheecaanka sanko) waxaa laga heli karaa:

- **Dhakhtarkaaga** ayaa ku siin kara dalabka baarista shaybaadhka. Liiska baaritaan bixiyaasha aqbalaaya bukaano cusub ayaa **laga heli karaa halkaan**.
- **ECDOH** waxay bixinaysaa baaritaan dheecaanka ah. Dalabka shaybaadhka lagaama doonaayo. Fadlan wac 716-858-2929 si aad u qabsato balanta baaritaanka.
- **NYSDOH** waxay bixinaysaa baaritaan dheecaanka ah. Wac 1-888-364-3065 si aad u qabsato balanta baaritaanka.
- **Ururo kale** ayaa bixinaaya baaritaanka sidoo kale. Urur kasta wuxuu leeyahay shuruudo u gaar ah. La xariir mid kasta si aad u hesho tilmaamo.

Baaritaanka Unugyada difaaca Jirka ee COVID-19 (Dhiiga)

- Baaritaanka unugyada difaaca jirka ee COVID-19 waa baaritaan gaar ah. Waa baaritaan dhiiga ah oo lagu fiirinaayo unugyada difaaca jirka oo ku jira dhiigaaga. Difaacyada jirku waxay soo baxaan marka nidaamka difaaca jirku uu ka jawaabaayo jeermis, oo inta badan ah fayras ama bakteeriyo. Unugyada difaaca jirku waxay awoodi karaan inay kaa caawiyaan la dagaalanka in isla jeermiska marka labaad ee aad jeermiska qaado hase yeehsee, wali lama ogaan in arintaani ku dhacdo iyo in kale qof kasta oo qaba ama uu ku dhacay COVID-19. **Aad ayay muhiim u tahay inaad xasuusnaato** in marka unugyada difaaca jirka ee uu kiciyay cudurka COVID-19 laga helo qof, saynisyahanadu wali ma garanayaan in qofkaasi haysto difaac ka dhan ah inuu qaado caabuqyo mustaqbalka iyo mudada difaacaasi jiri karo. COVID-19 waxaa keena fayras cusub daraasaad badan ayaana socda si xog badan looga ogaado cudurka iyo sida nidaamka difaaca jirku uga falceliyo. Wixii su'aalo ah oo la xariira baaritaanka dhiiga, la xariir dhakhtarkaaga.
- Arag [Baaritaanka CDC ee cudurka COVID-19](#)
- Arag [Xaashida Xaqiiqooyinka ee Baaritaanka Unugyada Difaaca Jirka ee NYSDOH ku samaynayso COVID-19](#)
- Arag [Xaashida Xaqiiqooyinka ee Baaritaanka Unugyada Difaaca Jirka ee Abbott Laboratories Inc. ku samaynayso COVID-19](#)

Hadii lagaa helo ama lagaa waayo COVID-19 noocuu rabo ahaado baaritaankuye, waxaad wali qaadannaysaa talaabooyinka ka hortaga ah [si aad u difaacdo naftaada iyo tan dadka kale](#). [Baraha Baaritaanka COVID-19 ee Degmada Erie](#)

14. Ma la iga baari karaa COVID-19 anoo guriga jooga? Ka waran haddaan qalabka baarista oonleen ku qato?

FDA ayaa aqoonsatay baaritaanka dheecaanka ee COVID-19 oo leh dookha aad kiishad ku qaadayso tijaabada baaritaanka bishii Abriil 21, 2020. Baaritaankaan waa mid isticmaalkiisu kooban yahay waxaana kaliya laga helaa LabCorp.

Ka feejignooow webseetyada iyo waraaqaha kale ee ku siinaaya natiijooyinka baaritaanka COVID-19 adoo guriga jooga. Kuwaani waa been abuur. Talada caafimaad ee ugu haboon ee aad hesho waxay ka imaanaysaa dhakhtarkaaga.

FDA waxay leedahay laynka tooska ah ee macaamiisha si aad u hesho xog guud aadna cabashooyin uga gudbiso tuugada gadaysa maadooyinka la xariira COVID-19 adoo wacaaya 1-888-INFO-FDA.

15. Daawo ama talaal ma leeyahay cudurku?

Waqti xaadirkaan lama hayo wax talaal ah ama daawo gaar u ah cudurkaan. Dadka qaba COVID-19 waxay raadsan karaan daryeel caafimaad si looga jabiyo qandhada xanuunka. Talada caafimaad ee ugu haboon ee aad hesho waxay kaaga imaanaysaa dhakhtarkaaga.

DIGNIINTA TUUGADA: Haddii aad hesho iimeel, wicitaan taleefan, ama bandhig laguugu soo diray boostada ama xayiiisiin qaab kale oo la xariira baaritaanada COVID-19 ama daawayn, iska dami oo ha dhagaysan warkooda.

16. Waa maxay maadooyinka nadaafada ee aan adeegsan karo?

Nadiifi oo **daawada jeermiska mari** meelaha iyo alaabta badanaa la taabto (tusaale ahaan: miisaska, qataarada albaabka, batoonada nalka laga daaro, gacanada, miisaska, musqusha, tuubooyinka biyaha, siimanka). Arag xogta [Nadiifinta iyo Marinta Daawada Jeermiska Gurigaaga](#) waxaana haboon inaad isticmaasho [daawooyinka jeermiska dila ee guriga ee ka diiwaan gashan EPA](#). Raac tilmaamaha ku qoran dusha qasaca (sida xirashada gacmo gashi iyo

xaqiiijinta inaad hawo fiican qaadanayso inaad daawada isticmaalayso) si aad u xaqiijiso adeegsiga badqabka iyo waxtarka leh ee daawada.

17. Xagee ayaan ka helayaa xog ku saabsan socdaalka?

Dhammaan wixii su'aalo ah oo la xariira socdaalka booqo [webseetka CDC ee socdaalka inta lagu jiro COVID-19](#).

18. Waa maxay Qof Baaritaan Ku socdo (PUI)?

PUI waa qof buuxshay shuruudo gaar ah oo ay dajisay CDC si joogto ahna looga fiirinaayo cudurka.

19. Waa maxay farqiga u dhaxeeya karantiin iyo karantiilid?

Marka koobaad, labada eray ba Takoorid iyo Karantiilid waa isku macno maadaama labaduba ay qofka kusoo rogayaan xanibaad si loo yareeyo faafida xanuun dadku is qaadsiiin karaan. Farqiyadu waa sida soo socota.

- **Takoorku** wuxuu ka fogeeyaa dadka xanuunsan ee qaba cudurka dadka aafeeya inay ku ridaan dadka kale.
- **Karantiilku** wuxuu kala saarayaa dadka wuxuuna ka xanibayaa dhaqdhaqaaqa haddii ay joogeen meel uu ku faafay cudurku si loo hubiyo inay cudurka qabaan iyo in kale.
- Arag Su'aasha #11.

20. Xagee ayaan ka helayaa xog ku saabsan COVID-19 iyo Uurka?

Arag [xogta NYSDOH ee Uurka iyo COVID-19: Ilaha Xogta ee Haweenka Uurka leh iyo Qoysaska \(03/21/2020\)](#)

Arag [xogta CDC ee Uurka iyo Naas Nuujinta](#)

21. Xagee ayaan ka helayaa xog ku saabsan COVID-19 iyo Xayawaanada?

Arag [xogta CDC ee Xayawaanada iyo COVID-19](#) Arag [xogta FDA ee COVID-19 iyo Xayawaanadaada Rabaayada ah](#)

22. Xagee ayaan ka helayaa ilaha bulshada?

Noocyo kaladuwan oo ah [Ilaha xogta ee bulshada ayaa laga heli karaa halkaan](#) si ay kaaga caawiyaan maaraynta xaalada COVID-19.

23. Dadka laga helo cudurka COVID-19 ma laga doonayaa inay u sheegaan shirkada ay u shaqeeyaan?

Maya.

24. Shirkadaha loo shaqeeyo ma laga doonayaa inay u sheegaan shaqaalahooda haddii lasoo gaarsiiyay wax sheegaaya in qof ganacsiga qayb ka ah uu qabo COVID-19?

Maya.

25. Sidee ayaan ugu deeqi karaa dhiiga?

Haddii lagaa helay COVID-19 aadna hadda si buuxda u bogsootay, waxaad ku deeqi kartaa Dhiiga. Haddii aad ku deeqdo, dhiigaaga waxaa ka buuxa unugyadaan difaaca jirka waxayna qayb ka gaysan kartaa daawaynta ama kahortaga COVID-19 ee ku dhaca dadka kale. Dhiiga lagu deeqo ayaa hadda la adeegsan karaa, si loo aburo daawo, xataa kahor intaanaan samayn tijaabooyin caafimaad, ama wuxuu qayb ka noqon karaa tijaabooyinka lagu go'aaminaayo sax ahaanshaha in daawadaan shaqaynayso.

Aarag [baakada macluumaadka ee barnaamijka Jaamacada Buffalo](#) ama wac 716-888-4845 ama 716-888-4840 si aad u hesho xog dheeraad ah.

Arag [buuga xogta ee Barnaamijka Roswell Park](#)